



**Jamhuuriyada Somaliland.**

**Golaha Wakiilada JSL.**



## **Warbixinta**

**Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 16<sup>aad</sup> ee  
Golaha Wakiilada JSL.**

**17/09/2011-29/11/2011**

## **Ku: - Mudanayaasha Golaha Wakiilada JSL.**

### **Ujeedo: - Warbixinta Shir-gudoonka ee kal-fadhigii 16aad**

*Mudanayaal*

Si aad hawlaha qorshaynta kal-fadhiga 17aad ee Golaha Wakiilada u dardar galisaan una gudataan xilka la idiin soo igmaday, waxaan halka idiinku soo gudbinayaa waxqabadkii Golaha Wakiilada ee kal-fadhigii 16aad oo dhamaystiran si aad u xasuusataan..

#### **Kal-fadhigii 16aad**

No	Kal-fadhiga	Taariikhda uu furmay	Taariikhda uu xidhmay
1.	16aad	17/9/2011	29/11/2011

Kal-fadhigan oo Mudanyaashu ka doodeen ajendaha kal-fadhigan 18/09/2011 doodan oo socotay hal maalin oo kaliya ayna ka qayb qaateen 15 mudane ayuu ka soo baxay Ajendihii kal-fadhigii 15aad oo la ansixiyay.

#### **Warbixinta Shirgudoonka iyo Gudiyada kale ee Golaha**

Warbixintii shirgudoonka ee kal-fadhigii 16aad ayaa ugu horaysay warbixinadii kal-fadhigaa laga akhriyay golaha intaa ka dibna waxaa warbixinadii gudiyadu ahayd sidan hoose:-

No	Gudidda	Cida soo jeedisay
1.	Warbixinta Gudidda Joogtada	Gudoomiyaha G. Md. Maxamed Barkhad miigane
2.	Warbixinta Gudidda Garsoorka, Cadaalada iyo Dastuurka	Gudoomiyaha G. Md. C/raxman Cisman Caalin

#### **Xeerarka Goluhu ka dooday oo Ansixiyay**

No	Xeerka	Taariikhda	Halka Loo gudbiyay
----	--------	------------	--------------------

1.	Xeerka Anshaxa iyo Nabadgalyada Guud Xeer Lr.51/2011	29/10/2011	Golaha Guurtida
3.	W.Ka abista Xeerka Doorashooyinka G.Deegaanka M/tooyada Xeer Lr20/2011	23/11/2011	Madaxweynaha
4.	W. ka badalka iyo Kaabista Xeerka Ururada iyo Axxaabta Siyaasada	27/11/2011	Madaxweynaha
5.	W. ka badalka iyo Kaabista Xeerka Diiwaangalinta Codbixiyayaasha	20/11/2011	Madaxweynaha

## Masuuliyiinta Goluhu Ansixiyay Kal-fadhiga 16aad

### A. Golaha Wasiirada

No	Magaca Masuulka	Xilka uu hayo	W/la Ansixiyay
1	Md. Maxamed Nuur Caraale Duur	W. Wasaarada Arrimaha Gudaha	27/09/2011
2	Md. Maxamed Rashiid	W. dawlaha Wasaarada Arrimaha Dibada	27/09/2011

### B. Guddiga Diiwaangalinta Ururada Axxaabta Siyasada

No.	Masuulka	Xilka Masuulka	w/la Ansixiyay
1.	Md. Maxamed Cabdi Maalik	G. Diiwaangalinta Ururada Axxaabta Siyasada	27/09/2011
2.	Md. Xasan Axmed Ducaale	G. Diiwaangalinta Ururada Axxaabta Siyasada	27/09/2011
3.	Md. Ismaciil C/lahi Cali	G. Diiwaangalinta Ururada Axxaabta Siyasada	27/09/2011
4.	Md. Cumar Xasan Axmed	G. Diiwaangalinta Ururada Axxaabta Siyasada	27/09/2011
5.	Md. Aadan Geedi Qayaad	G. Diiwaangalinta Ururada Axxaabta Siyasada	27/09/2011
6.	Md. Cabdale Ibrahim Maxamed	G. Diiwaangalinta Ururada Axxaabta Siyasada	27/09/2011
7.	Md. C/risaq Jaamac Cumar	G. Diiwaangalinta Ururada Axxaabta Siyasada	27/09/2011

## **1. MOOSHINADA GOLAHA LA HORKEENAY EE LAGA DOODAY**

1. Mooshinkii Wax Ka-badalka iyo Kaabista Xeerka Doorashada G. deegaanka iyo Madaxtooyada
2. Mooshinkii Wax ka-badalka iyo Kaabista Xeerka Diiwaangalinta ee Diiwaangalintii hore lagu laalay
3. Mooshinkii Wax Ka-badalka iyo Kaabista Xeerka Ururada iyo Axxaabta Siyaasada.
4. Mooshinkii Xeerka Baanka Dhexe ee Somaliland

## **1. Aqoon-korodhsiyada Guddiyada Golaha**

- **Guddida Khayraadka Dabiiciga** oo Gacanta k u haysay Xeerka Fayadhawrka ayaa laba workshop u qabatay, Workshopka hore oo ay ku qabteen Magaalada Hargiesa waxaa ka soo qaybgalay Daneeyayaasha Xeerka, Workshopka oo la socdey Kormeerida kawaanada iyo sariibadaha Magaalooyinka Burco iyo Boorame. Lana kulmeen Daneeyayaasha kala duwan ee Xeerka Fayadhawrka Hilibka oo Gudidu midba 3 maalmood qaateen.
- **AWEPA:** - waxay tababar aqoon korodhsi u samaysay Guddiga Joogtada ah, aqoon korodhsigan oo Guddiga siinayay Mudane ka tirsan Barlamaanka Dalka Kenya **Mr. Ooloo Oringo**, kaas oo qaybtii 2aad ahaa, waxa aqoon korodhsi ka siiyay siday u shaqayso Guddiga Joogtada ah ee iyo Awooda iyo Waajibaadka Guud ee Guddigu Golaha wakiil uga tahay.
- **AWEPA:** - waxay workshop hal maalin soconayay ku tababartey shaqaalaha Golaha Wakiilada, kaas oo ka dhacay Hotel Maansoor, waxayna ku qaateen Parliament Business and Procedure.

## **Waxqabadka Guddiyada**

### **Guddida Joogtada iyo anshaxa.**

Guddigu iyadoo ka wakiila Fasaxyada Golaha waxay kal-fadhigii 16aad, iyadoo la kulmay Masuuliyiin Qaran oo farabadan, Guddida iyadoo ka duuleysa waajibaadkeeda Dastuurka iyo Xeer Hoosaadka Golaha, Muhiimadana siinaya xil-gudashada hawlaha Qaran, Wasaaradaha iyo Hayadaha dawlada, waxay kulan xog waran la yeelatay:-

1. Wasaaradda Arrimaha Gudaha
2. Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo iskaashiga caalimaga
3. Wasiirka Macdanta iyo Biyaha
4. Wasiirka Beeraha iyo Khayraadka Dabiiciga ah.

## **Gudidda Khayraadka Dabiiciga, Macdanta iyo Xoolaha Nool.**

Gudidu waxay markii labaad laba kulan hawleed u qabatay Xeerka Baadhista Hilibka oo ku kala qabteen Magaalooyinka Burco iyo Boorame, Gudidu waxay ugu horeyn kormeer ku soo mareen Maalintii koowaad Kawaanada iyo Sariibadaha Magaaliyinka Burco iyo Boorame, Maalintii labaadna waxay la kala kulmeen daneeyaasha Xeerka Baadhista iyo Fayadhowrka Hilibka ee ku kala dhaqan Magaalooyinka Burco iyo Boorame, waxaana Maalgalisay safaradaa Hay'ada FAO ee Qaramada Midoobey.

## **Kulanhawleedyadii Xeerka Ilaalinta & Baadhista Hilibka Ee Burco Iyo Boorama.**



Guddigu Waxay **22 -26 December** ku qabteen magaalooyinka Burco iyo Boorama kuwaasoo lagaga doodayey Xeerka Ilaalinta iyo Baadhista Hilibka, waxaana ka soo baxay talooyin muhiim u ah dhammaystirka xeerkan.

## **SAFARKII MUNAYAASHA EE GOBOLADA DALKA:-**

**Gobolka Togdheer:-** Waxaa hawl shaqo ugu ambabaxay gobolka Togdheer 09/08/2011, Xildhibaanada ka tirsan Golaha Wakiilada JSL. Socdaalkaas oo qaatay muddo todoba cisho ah, waxay weftigu kulamo la yeeshen qaybaha kala duwan ee bulshada iyo hay'adaha dawlada ee gobolka. Nabadgelyada, Xabsiga wayn ee Burco, Caafimaadka gobolka, Waxbarashada gobok, Jidka Burco- Oodweyne iyo Kulamadii Bulshada gobok



**Talo soo jeedin:-** Waxaanu ku talinaynaa si looga jawaabo baahiyaha asaasiga ah iyo duruufaha nololeed ee dadweynaha bobolka in si dhakhso loo fuliyo arimahan:

- hay'ada dalka ka hawlgala dalka laga shaqo geliyo gobolka kuwaas oo aan wax muuqda ka qaban halkaas.
- in miisaaniyada qaranka oo gebi ahaan ku baxda xarumaha wasaarada la deegaameeyo isla markaana hay'ada dawlada ee gobolka loo qoondeeyo saamigii gobolku xaqa u lahaa.
- in ciidamada booliska ee gobolka la tayeeyo loona sameeyo gaadiid iyo saldhigyo ay ku hawl geli karaan.
- in sabsiga dhexe ee Burco ay dawladu si dhakhso u dhisto iyadoo la kashanaysa hay'adaha dalka ka hawl gala.

**Gobolka Maroodijeex:-** Guddi ka koobnayd saddex xubnood oo matalaaya xildhibaanadii laga soo doortay gobolka maroodi jeex ayaa dhawaan booqasho ku kala bixiyay qaybo ka mida gobolka. Kooxdan waxay ahaayeen **Xildhibaan Ahmed Mohamed Dirie (Nacnac), Xildhibaan Ibrahim Mahdi Buubaa iyo Xildhibaan Bashir Hussein Tukaale.** Guddidan oo ujeedada socdaalkoodu ahaa in ay daba gal ku sameeyaan waxa ay xukuumada cusubi u qabatay ilaa hadda intii ay jirtay



Giddidu waxa ay kormeerkooda ka bilaabeen Degmada Gabiley, Si aad u heersaraysa ayaa loogu soo dhaweeyay halkaasi iyadoo dadwaynihii goobtaa ka ag dhawaa u riyaaqeen imaatinka xildhibaanada. Waftigu waxa ay kulaan balaadhan oo wada jira la qaateen duqda magaalada gabiley marwo Khadra X. Ismail yonis iyo duqeyda, caaqilada iyo wax garadka degmadaasi.

Guddidu waxa ay maalinti labaad sii wateen socdaalkoodii iyagoo socod ugu ambabaxay jiida konfureed ee gobolka maroodijeex. Guddidu iyagoo markan ka kooban laba xubnood **xildhibaan Ibrahim Mahdi Buubaa iyo xildhibaan Ahmed Mohamed Dirie (Nacnac)** waxay tageen degmada Salaxley. Waxay halka kulan la yeesheen duqa magaalada iyo odayaasha deegaanka.

Isla maalinta waxa ay kooxdi xildhibaanada xaqiiqo raadiska ahayd u sii dhaafeen dhanka Baligubadle. Sidoo kalana halka waxay ay kulan wada jira la yeesheen badhasaabka gobolka hawd **Jamaal Hussein Hurre** iyo guddoomiyaha maxkamada, taliska bilayska ururada haweenka iyo wax garadka magaalada. Waxa ay soo mareen meelo badan oo ay ka mid yihiin xafiiska dawlada hoose, MCH-ka magaalada, maxkamada iyo saldhiga military-ga.

Ugu danbeyntii isku soo wada duuduuboo xildhibaanadani waxay u balan qaadeen dhammaan dadkii ay la kulmeen in ay warbixintooda u soo bandhigi doonaan cid alle ciddi ay khusayso oo aanay ka seexanayn ilaa baahiyahaa jira si degdega wax looga qabto. Waxay sheegeen in ay albaabkasta gaaraci doonaan. Waxay ku guubaabiiyeen dhamman goobaha in ay hore marka halkaa ka sii wadaan, tana maaaha booqashadii ugu dambaysay ee aanu idiinku imanayno balse maanta laga bilaabo wada shaqayn baa inaga dhaxayn doonta.

**Gobolka Awdal:** - Mudanayaasha Golaha wakiilada ee laga soo doortey Gobolka Awdal ayaa socdaal indha indheyna ah (Constituency Outreaching) u tagey deegaanadii laga soo kala doortey iyagoo u kuurgalay xaaladaha Maxkamadaha, Iskuulada, Cusbataalada iyo Goobaha Codbixinta, sidoo kale waxay la kala kulmeen mudo saddex maalmood ah dad weynaha Magaalada Boorame iyagoo ka xogwareystay xaalada dhaqan dhaqaale iyo ilaalinta Nabadgalyada, Caafimaadka, Waxbarashada iyo heerarka Horumarineed ee Gobolka

**C/risaaq Siciid Ayaanle**  
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL.**

---